

# Lacag dheeriga ah iyo taakulaynta shaqo la'aanta

## Waa maxay "lacagta dheeriga ah?"

Lacagta dheeriga ah ee kabka shaqo la'aantu waxay dhacdaa marka qof helo kab mardanbe la ogaado inaanay ku haboonayn inay helaan.

Tani waxay ku dhici kartaa labo sababood:

1. **Haddii aad heshay kab ka badan midkaad xaqa u lahayd.** Tusaale ahaan:
  - Waxa lagugu siiyey lacag shuruud markaanu eegnay codsigaaga.
  - Ka dib dibu eegista, waxaanu ogaanay inaanad ku haboonayn xadigaasi.
  - Haddii tani dhacdo, waxaan kuusoo diri doonaa Qiimeynta Lacagta Dheeriga ah oo kuu sheegi doonta inta lagugu leeyahay.
2. **Haddii aad ku guul daraystid inaad naga codsatid macluumaad.** Tusaale ahaan:
  - Waxaad heshay ogeysiis ah inaan kaaga baahanay macluumaad adiga. Tusaaleyaashu waxay noqon karaan inaan u baahanay inaan xaqiijino aqoonsigaaga ama waxaan u baahanay macluumaad badan oo khuseeya sababta aad shaqada uga tagtay. Waa inaad kusoo jawaabtid 10 cisho gudohood.
  - Haddii aanad kusoo jawaabin wakhtigaasi gudihiisa waxaan ku khasbanaanaynaa inaan joojino lacagta dheeraadka ah, soo saarno diidmada kabka marka hore lagu siiyey, oo ka dibna soo dirno ogeysiis lacag dheeraada.
  - Ogow: Lacagtan dheeriga ah waa laga noqon karaa markaad dhameystirtid codsiga rasmiga ah ee macluumaadka ee la ogaado inaad ku haboon tahay kabka. Haddii aad seegtay wakhtiga kama danbeysta ah, rafcaan ka qaado go'aankayaga oo bixi macluumaadka la codsaday. Iyadoo ay ku saleysan tahay rafcaanka, lacagta dheeriga ah waa laga saari karaa markaan xaqiijino inaad ku haboon tahay.

Waxaad rafcaan ka qaadan kartaa go'aanka lacagta dheeriga ah adoo raacaya tilmaamaha aan markadanbe kuusoo dirno. Waxaad sidoo kale waxbadan ka ogaan kartaa rafcaanka [boga Benefits Denials and Appeals \(Diidmada iyo Rafcaanka Kabka\)](#) ee wabsaaydkayaga.

## **Fadlan ha iska dhega tirin ogaysiiska lacag bixinta dheeraadka ah.**

Ilaa aad ahayd dhibane tuug khiyaamo sameeyey, hoos lagu sheegay, waxa muhiima inaad u akhridid ogeysiiska lacagta dheeriga ah si taxadir leh oo raacdid tilmaamaha. Haddii lacagta dheeriga ah ay ka dhalatay macluumaad maqan, nalasoo xidhiidh sida aanu ku sheegnay warqada si aan u sixi karno arinta, ama u dejin karno qorshe lacageed oo kugu haboon.

## **Si aad waxbadan uga ogaatid sameynta qorshayaasha lacagta ama dibu bixinta lacagta, la xidhiidh qeybta taakulada:**

**866-697-4831**

## **Si aad waxbadan uga ogaatid sababta aad u leedahay lacag dheeriya, la xidhiidh xarunta codsiga:**

**800-410-0758. Ka wac kordhinta 12 si aad caawimo ugu dalabtid Soomaali(turjumaano bilaash ah ayaa la heli karaa).**

Employment Security Department (Waaxda Amaanka Shaqada) waa barnaamij/shaqo abuure baxsha fursad loo siman yahay. Taageerooyinka kaalmaatiga iyo adeegyadu waa diyaar markii ay codsadaan shaqsiyaadka naafada ah. Adeegyada caawimaada luuqada ee dadka aan si fiican u aqoon luuqada Ingiriiska ayaa si bilaash ah lagu helayaa. Adeegga Dhagoolayaasha Washington: 711